**SHARCIGA Lamb. 6 ee 25 Jannayo 1968**

**Dhisidda hey'adda qaranka ee dhismaha**

**MADAXEYNAHA JAMHUURIYADDA**

KADIB isagoo ka baaran degey ansixidda Golaha Sharci Dejinta

**WAXAA LA AMRAY**

Sharcigaan halka ku qoran:

## Cutubka 1aad

Amarrada Guud

### Qod. 1
### Dhisidda Hey'adda

1. Waxaa la dhisay Hey'adda Qaranka ee Dhismaha;
2. Hey'addu waxay yeelaneysa shaqsiyad qeynuuni ah iyo is maamul xor ah;
3. Hey'addu waxay hoos imaaneysaa amarradda guud eek u tixan sharci-dekreeto; lamb. 5 ee 16 Agoosto 1966 oo lagu beddelay Sharciga lamb. 19 ee 10 Diseembar 1966 oo la xiriira kormeerka maamulida Hey'adaha danta guud.

### Qod. 2
### Goobaha Sharciga ah

Saldhigga Hey'adduu waa Muqdisho waxaana lagu suubin karaa qeyb goob kasta oo loo garto in lagu suubiyo.

### Qod. 3
### Ahmiyadda

1. Hey'addu waxay horumrin doontaa guriyeenta dadweynaha ee Jamhuuriyada Somaliya
2. Sidaas awgeed Hey'addu waxay:
   a) In la qorsheeyo dhismaha guryeenta iyadoo la tixraacayo siyaasadda iyo tilmaamaha Dowladda;
      i. In la dhiso guryo deegaanka qoysaaska oo aanan awood u leeheen in ay suuqda ka heelaan;
      ii. In la taakuleeyo lana dhiiri geliyo mashaaricda gaarka loo leeyahay ee qalaha dhismaha;
      iii. In sare loo qaado dhismaha gudahasi loo kordhiyo adeegaya dhismaha ee dadweynaha.
   b) In la hormariyo dhismaha guriyeenta ee dalka;
      i. Iyadoo tartan la gelin doono;
      ii. Ama hab iskaashato la adeegsan doono.
   c) In loo qorsheeyo dhisidda xaafaddo cusub ama magaaleeynta iyadoo loo qeybin doono dhul go'gaan oo loo dhameeyey adeega guud;
   d) In ay diyaar gareeyso mashaariic iyo qaabab standard ah ee la jaanqaadi karo baahida guriyeenta qoysaaska aan hanti lahayn iyadoo la tixgelin doono cimiladda, dhaqanka iyo dabeecadda dadweynaha;

e) Hirgelinta tirakoobka iyo cilmi barista mashaaricda Hey'adda;
f) Dhisidda iyo qaabeynta keyka maaliyadeed ee la xiriira howladha dhismaha ee guryaha dadweynaha;
g) Kormeerka iyo maamulidda ijaarka iyo iibinta guryaha dadweynaha;
h) Raadinta iyo iskudubaridka maalgelinta (ee Bangiyada iyo Hey'adaha Amaahda iwm) ee lagu taakuleeynaya shaqsiyaadka iyo iskaashatooyinka, loo-shaqeyeeha ee howlaha dhismaha;
i) Jaangooynta baahidda agaabyada dhismaha, soo jeedinta talooyinka soo saarista iyo qeybinta iyo isticmaalka qalabka dhaqamiga ah iyo kuw casriga ah, dhirigelinta suubinta agaabyada lagu jaangooyo qaabka la joogteeyey si loo hirgeliyeyo soo saarista jumlada ah ee blukeetiga ama kuwa dhoobada laga saemeeyey sida jilayga, kuwa shamiintada iyo nuuriyadda ama agaabyada la isku sar gooyey cabirkooda sida albaabaha iyo ddariishadaha, kuwa horay loo suubiyey iyo isticmaalka qalabka haraaga ah oo ay Dowladdu leedahay ama kuwa qiimaha jaban ku fadhiya;
j) Soo uruurinta iyo dib u barista macluumaadka qaababka teknikada ah ee ugu horumarsan oo laga isticmaalo dowladaha leh isku dabeecad cimilo ee dalkeena si loogaga hirgeliyo hababkaasi dhismo;
k) Baarista qiimaha soo saarista iyo dhismaha si loo yareeyo kharajka guud
l) In la isku dubariddo talooyinka lagu suubi lahaa Xeerka Dhismada iyo cutubyada isku jaan go'an ee boorarkaa qiimeynta ee dalka gudahiisa;
m) Qiimeynta farsamaqaanka teknikada iyo shaqaalaha ee herar kala sareeya iyo bilaabista mashaaricda tababarrada iyo koorsooyinka wargelinta ee qeybaha kale duwan ee shaqaalaha;
n) Isku dubariidka qiimeynta ugu hooseeysa ee dhismooyinka lagu dabaqi karo marxaladaha cimiladaha iyo talo soo jeedinta sidii loo soo saari lahaa shuruuc lagu haggi lahaa;
o) Gadashada iyo qiimeynta dhulalka, jeexjeexidda qorshaha dhulka iyo sariista qiimo macquul ah. Helista in qiimo u gaar ah lagu heli karo dhul loogu tala galay danta guud;
p) Soo banghigga hababka dhismaha iyo qabanqaabidda carwooyinka lagu soo bandhigi doono qababka dhismaha ee qiimaha jaban ee gureynta dadweynaha;
q) Soo iibista si jumla ah agabyada dhismaha ee isku jaan go'an si dib loogu iibiyo iyado loo faa'ideyn doono dadka ka tirsan mashaaricda Hey'adda;
r) Baarista farsamada qalabka iyado la suubinaya shey'baar iyo barista si loo ogaado in qalablka laga helo gudaha iyo agabyada dhulka la helo ay ku haboon yihiin in lagu hormariyo teknikada dhismooyinka;
s) In la galo heshiisyada loo baahan yahay;
t) In la maamulo oo la kormeero maaliyada Hey'adda haddii uusan sharcigaan si kale tilmaameynin;
u) In la fuliyo howl kasto ee dhismaha ah oo si ku meel gaar ah ay Hey'addu u xil saarto Wasaaradda uu qaabilsan;

**Qod. 4**
**Hantida**

Hantida Hey'addu oo lagu magacabo Keydka Dhismaha wuxuu ka kooban yahay:

1. Keydka hordhigga ah ee So Sh. 1,000.000 oo Dowladdu u dhigtay, Sh So. 250.000 oo Misaaniyadda 1968 laga soo bixiyey;
2. Deeq kasta oo ay Dowladdu ugu deeqdo, ama Hey'adaha Guud ama Hey'adaha Caalamiga ah ama kuwa gaarka loo leeyahay;
3. Lacagta ka soo gashaa ijaarka ama iibista dhulalka la jarjaray iyo dhismyooyinka ay Hey'addu leedahay;
4. Lacag kasto oo ka timada dhinaca dowladda ama kuwa gaarka ah.

**Qod. 5**
**Awoodaha**

Hey'adda waxaa la siiyey awood kasta ee fursad u siineysa in ay fuliso howlaheeda ku xeendaabana sharcigaan.

**Qod. 6**
**Ilaalinta**

1. Ilaalinta Hey'adda waxaa u xilsaaraan Guddiga Ilaalinta oo uu madax ka yahay Wasiirka Howlaha Guud wuxuuna ka kooban yahay;
   — Wasiirka Qorsheynta iyo Iskudubarridka;
   — Wasiirka Maaliyadda.
2. Guddiga Ilaalinata wuxuu magacaabi kara guddiyo hoosaad ah ee qabiiro ah oo u xil saran in ay ku taakuleeyaaan howlahooda Guddiga;
3. Si u uu ansaxmo go'aanada shirarka Guddigga Ilaalinta waa in ugu yaraan 2 xubin ay soo xaadiraan.

**Cutubka 2aad**
Qaab dhismaha Hey'adda

**Qod. 7**
**Xubnaha**

Xubnaha Hey'addu waxay ka koogan yihiin:

1. Guddiga Maamulka oo ay ka mid yihiin Guddoyimaha Hey'adda iyo 6 Lataliye oo ka kala socda 2 Lataliye wasaaradda Howlaha Guud, 2 Wasaaradad Maaliyadda iyo 2 Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskudubaridka;
2. GUddomiyaha Hey'adda;
3. Agaasimaha;
4. Guddigga dib-u-eegidda oo ka koohan Guddomiyaha iyo 2 Dib-u-eegayaal oo ay Wasaarada Maaliyadda ay soo dirtay.

**Qod. 8**
**Magacaabista**

1. Guddomiyaha Hey’adda, La-taliyeyaasha Maamulka, Agaasimaha, Guddomiyaha Guddiga Dib-u-eegista, iyo xubnaha dib-u-eegayaalka ah waxaa kulligon lagu magacaabi doona Dekreeto Madaxweynaha Jamhuuriyada iyado uu soo jeediyey Wasiirka Howlaha Guud iyado la dhegeestay aragtida Golaha waiiradaha;
2. Muddada ay xilkasi hay doonaan waa 3 sano waxana mar kale dib loogu magacaabi doona.

**Qod. 9**
**Shaqaalaha Hey’adda**

1. Shaqaalaha Hey’adda waxaa magacaabi doona Agaasimaha kadib markii uu la tashtay Guddiga Maamulka;
2. Dhaqaalaha shaqaalaha Hey’adda iyo marxaladaha kale ee shaqada waxaa qoraayaa xeer nidaamikaya ay Hey’addau ku soo saarta sharcigaan.

**Qod. 10**
**Dhaqaaleynta shaqalaha**

Waxaa Dekreeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda iyadoo la tixgeliyey soo jeedinta Wasiirka Howlaha Guud iyo Golaha Wasiiraddaha lagu tilmaami doona dhaqaaleynta Guddomiyaha Hey’adda, La Taliyeyaasha Maamulka, Agaasimaha, Guddomiyaha Guddiga Dib-u-eegidda iyo Dib-u- eegayaasha.

**Qod. 11**
**Mas’uuliyadda**

Agaasimuhu iyo shaqaalaha markii ay gudaan howlalaha sida ku cad Sharcigaan iyo xeerarka nidaaminta waxay mas’uul ka yihiin xaafiiska sida uu qeexaayo qod. 5 ee Xeerka Shaqalaaha rayidka ah ee dowladda.

**Cutubka 3aad**
Howlaha Hey’adda

**Qod. 12**
**Xilka Guddomiyaha**

1. Guddomiyaha Hey’adda wuxuu wakiil ka yahay Hey’adda markii uu shaqo ahaan ula xiriirayo Dowladda, Hey’adaha kale ee dowliga, shaqsiyaadka iyo kuwa leh shaqsiyadda qaynuuni ah iyo kuwa si gaar ah loo leeyahay;
2. Guddomiyuhu wuxuu isu yeeri doona madaxna ka yahay Guddiga Maamulka, kaasoo soo hordhigi doono arrimaha maalinle laha ah oo loo baahan yahay in xubnaha Guddiga Maaulka ay go’aan ka gaaran;
3. Markii uu ka maqan yahay shaqada, waxaa beddeli doona si ku meel gaar ah shaqsiga ugu cimriga weyn ee xubnaha Guddiga.

**Qod. 13**
**Xilka Guddiga Maamulka**

1. Guddiga Maamulka waa xubinta fulinta ee Hey’adda.

2. Isaga ayaa isku daba rido tilmaamaha iyo barnaamijyada Hey'adda wuxuuna mas'uul ka yahay maamulidiisa;
3. Guddiga Maamulka wuxuu shiri doona ugu yaaraan 1 mar bishiiba;
4. Si loo ansixiyo shirka Guddiga Maamulka waa in ugu yaraan 4 xubin ay xaadir yihiin;
5. Agaasimaha Hey'adda ayaa taakuleyn doono shiraarka Guddiga Maaulka wuxuna yeelan doona xuquuqda Xoghayaya.

**Qod. 14**
**Xilka Agaasimaha**

1. Agaasimuhu waa xubinta fulinta ee Hey'adda. Wuxuu mas'uul ka yahay taaba gelinta tilmaamaha Guddiga Maamulka iyo go'aanadooda, oo ay horay u aqbaleen. Isaga ayaa iska leh awood Hoghayaha Guddiga;
2. Agaasimaha wuxuu yahay Madaxa Shaqaalaha Hey'adda, isagoo, kadib markii uu la tashtay Guddiga Maamulka iyo isago u hoggansan xeerarka u qoran Hey'addaha isticmaali doono amarrada loo baahan yahay;
3. Markii uu shaqada ka maqan yahay , Agaasimaha waxaa beddeli doona si ku meel gaar ah Sarkaal ka tirsan Hey'adda oo uu Guddomiyuhu magacaabo kadib markii uu la tashtay Agaasimaha laftiisa.

**Qod. 15**
**Xilka Guddiga Kormeerka**

1. Guddiga Kormeerka wuxuu shaqo ku leeyahay kormeerka arrimaha xisaabaadka, misaaniya iyo maamulida maaliyada ee Hey'adda;
2. Guddomiyaha Guddiga Kormeerka waxaa taakuleyn doona fadhiyadiisa Guddiga Maamulka, barista buuggaga iyo qorallada xisaabadka ee Hey'adda, barista xafiiska xisaabaadka, u hoggansananta talooyinka Guddiga Maamulka iyo kuwa Agasimaha.

## Cutubka 4aad
Maamulka Lacagta ee Hey'adda

**Qod. 16**
**Misaaniyadda sanadeedka**

Misaaniyadda sanadeedku waxay bilaaban doonta 1da Janaayo waxayna ku eg tahay 31 Diseembar.

**Qod. 17**
**Qorshada sanadeedka iyo misaaniyada hor dhaca ah**

1. Ilaa iyo 30 Seteembar ee sanad walba, Guddiga Maamulka wuxuu diyaarin doona Misaaniyadda hordhaca ah iyo qorshaha sanad laha ee sanadka soo socda. MIsaaniyadda iyo qorshaha waa in loo soo gudbiyaa Guddiga Kormeerka isago la soo marsiiyey Guddomiyaha si loo aqbalo.

**Qod. 18**
**Misaaniyadda**

1. 3 bilood gudahooda markii ay dhamaato misaniyad sanadeedka, (31 Maarso),

Agaasimhu wuxuu diyaari doonaa Misaaniyadii la isticmaalay, xisaabta daqliga iyo kharjka, wixii dhumay wuxuuna u soo gudbin doona Guddiga Maamulka. Bisha ku xigta Guddiga Maamulka wuxuu si rasmi ah u soo qori doona misaaniyada oo saxan, xisaabta la faa'iday iyo kuwa dhumay, wuxuuna u gudbin doona Guddiga Kormeerka iyadoo lagu lifaaqay warbixn;

2. Bisha ku xigta kadib markii ay heleen, Guddiga Kormeerka wuxuu baari doona xisaabadka loo soo diray wuxuna u gudbin doona Guddiga Ilaalinta;
3. Guddiga Ilaalinata, kadib markii ay la tashteen Xisaabiyaha Guud wuxuu aqbali doona misaaniya wuxuuna amri doona in lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah.

**Qod. 19**
**Xisaabinta**

Xisaabinta Hey'adda waxaa lagu dhowri doonaa iyadoo loo hoggaansanan doono Xeerarka uu soo saaray Wasiirka Howlaha Guud kadib markii lala tashtay Xisaabiyaha Guud.

**Qod. 20**
**Amaahda**

Iyadoo loo hoogansaan doono sharcigaan, Hey'adday waxay amah ka qaadan doontaa Bangiyada dalka ama hey'adaha ajaanibka ah kadib markii ay ka heshay ogolaansho Wasiirka Howlaha Guud lana tashay Guddiga Ilaalinata.

**Cutubka 5aad**
Amarrada Gaar ak ee la Xiriira Hey'adda iyo Keydka Dhismaha

**Qod. 21**
**Amarrad gaar ka ee la xiriira Hey'adda iyo Keydka dhismaha**

1. Qorallada iyo heshiisyada ama howlaha la qabta laga bilaabo maalintii ay hirgashay sharciga Hey'adda Qaranka ee Dhismaha oo la gu soo saaray sharciga no. 11 ee 18 Maay 1965, waxaa loo ictiraafi doono kuwa lagu dhaqan geliyey sharcigaan, Xisaabinta la xiriirta muddadaasi waxay hoos tegi doonana sharcigaan;
2. Keydka dhismaha waxaa la wareegi doona Hey'adda oo maamuli doonta.

**Cutubka 6aad**
Kaaliyaha Gaar ah iyo Xaliyaha Hey'adda

**Qod. 22**
**Kaaliyaha gaarka ah iyo xaliyaaha Hey'adda**

1. Kadib markii loo arko lagama maarmaan:
   a) Waxaa si ku meel gaar ah loo dhiibi doona maamulka Hey'adda Kaaliyaha Gaarka ah kaaso oo yeelan doono awoodaha Guddomiyaha Hey'adda, Guddiga Maamulka iyo Agaasimaha ama;
   b) Hey'adda waxaa lagu dhawaaqaya in xaliyo taas oo loo dhiibi doono Xaliye Gaar ah.
2. Amarrada sare ku xusan waxay hirgelin karaan oo keliya markii dekreeto

Madaxweynaha Dalka lagu soo saaro kadib markii lala tashtay Wasiirka Howlaha Guud iyo Golaha Wasiiradaha;

3. Haddii aan si kale loogu dhisin isla wareegtadii kala diridda, hantida saafiga ah ee ka hartay baabi'inta Hay'adda waxaa loo wareejinayaa Dowladda.

**Cutubka 7aad**

Amarrada Gunnanadka ah

**Qod. 23**

**Xeerka Hey'adda**

Xeerka Hey'addu waxaa lagu aqabli doona Dekreeto Wasiirka Howlaha Guud, iyadoo lala tashtay Guddiga Ilaalinta waxaana lagu wax laga beddeli kara iyadoo la raaci doono isla habkaasi.

**Qod. 24**

**Xeerarka nidaamiyaha Hey'addada**

Guddiga Maamulka wuxuu ansixi doona xeerarka nidaminaaya Hey'adda , sharcigaa iyo xeerkaa Hey'adda.

**Qod. 25**

**Xeerar la nasakhay**

Waxaa la nasakha xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan waafaqsanayn sharcigan.

**Qod. 26**

**Hirgaliddiisa**

Sharcigani wuxuu hirgalayaa maalinta ku xigta markii lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 25 Jennaayo 1968.

**ABDIRASCID ALI SCERMARKE**

Wasiirka koobaad
**MOHAMED HAGI IBRAHIM EGAL**

Wasaarka Hawlaha Guud
**MOHAMED HAGI IBRAHIM EGAL**